

## **Ku soo dhawoow wadahalal saameed!**

Annaga, oo macalimiintaada ah, waxaynu dooneynaa inaan waxbarashada u qorshayno si ay u noqoto mid adiga kugu habboon, ilaa iyo heerka ugu wanaagsan ee suurogalka ah. Sidaas daraadeed waxeynu dooneynaa inaan in dheeraad ah ka ogaanno waayoaragnimadaada iyo baahidaada xagga akhriska iyo qoraalka. Xaaladda aan macluumaadkaas ku raadineyno waxaan ugu magacdarnay *sahan*.

### **Sidee beynu wax u sahmineynaa?**

Sahanku waa wadahalal ka dhexeeya adiga iyo macalin, waana mid ka qaybgalkiisa loo madaxbannaan yahay. Wadahalalku wuxuu ku dhacayaa afkaaga hooyo, waxaanna heynaa qof inoo turjamaana.

### **Muxuu sahanku ka kooban yahay?**

Waxaan jeclaan lahayn inaan ogaanno inaad akhriska iyo qoraalka garaneyso, hadday sidaas tahayna - waxa aad luuqaddaada ku akhrisan jirtay oo aad ku qori jirtay, tusaale ahaan markaad joogtay guriga, shaqada ama laga yaabee iskuulka. Waayoaragnimadaas oo kale waxay muhiim u tahay barashada akhriska iyo qoraalka luuqad cusub. Waxaan inta badan ka wada hadli doonaa wakhtigii aad Iswiidhan timid ka hor. Hase ahaatee waxaan iyana ka wada hadli doonaa waxa aad dooneyso inaad ku akhrisato oo aad ku qorto af-Iswiidhishka.

Adiga luuqaddaada ku garanayey akhriska iyo qoraalka waxaa laga yaabaa in lagu diro inaad akhriso qoraallo dhawr ah oo aad ka jawaabto su'aalo iyaga ku saabsan. Dabadeed ayaad adiga iyo macalinka ka wada hadleysaan qoraalladii aad akhrisatay.

### **Maxaa dhacaya sahanka ka dib?**

Sahanka ka dib waxay macalimiintaadu heli doonaan warbixin ku saabsan wixii aan ka wada hadalnay. Taasoo macalimiinta, ilaa iyo heer, u sahleysa inay waxbarashadaada qorsheeyaan.